



RAKIB OO KU BIIR KULANKA SUUM (ZOOM) ADOO U SII MARAYA CASUUMAD IIMEYL (EMAIL) AH AAY BAADH & AAY FOON – iPad & iPhone

1

Fur fariinta iimaylka ee uu soo diray shaqsiga kugu casuumay ka qeybgalka Kulankooda Suum. Hal mar deg-deg u taabo xiriiriyahaa buluuga ah ee hoosta ka xariiqan.

Join Zoom Meeting


<https://us02web.zoom.us/j/84403144331?pwd=TIHhcnFUfFzbdjIMGdtaOxQengOUt09>

Meeting ID: 844 0314 4331

Passcode: 679549

3

Markuu Aab istoor (App Store) furmo, waxa shaashada dhanka sare ka soo bixi doona shirarka Suum Klaaowdh (ZOOM Cloud Meetings). Taabo **badhanka** buluuga ah ee HEL **'GET button'** si aad u bilowdo rakibidda Suum.



Ka dib marka rakibidu dhammaato, badhanka hel "GET" wuxuu isu bedelayaa mid oranaya FUR.

OPEN

2

Websaayt(Website) ayaa soo muuqan doona oo inaga caawin doona inaan rakibno Aabka (App) Suum. Taabo ereyada buluuga ah ee Aab istoor (App Store) si aad u bilowdo nidaamka.

Click **Open** on the dialog shown by your browser

If you don't see a dialog, click **Launch Meeting** below

Launch Meeting

Don't have Zoom Client installed? Download from [App Store](#)

4

Hadda oo barnaamijka Suum la rakibay, waa inaad ku noqotaa fariinta iimaylka ee uu soo diray shaqsigii kugu casuumay inaad ka mid noqoto Kulankooda Suum. Sidii markii hore oo kale, taabo xiriiriyaha buluuga ah ee hoosta ka xariiqan. Markan, wuxuu bilaabi doonaa aabka Suum.

BOGGA 1 EE 3

5

Muddo gaaban ka dib, qalabku wuxuu soo bandhigi doonaa fariinta "Fadlan magacaaga geli". Adiga oo adeegsanaya looxada qoraalka, ku qor magaca aad jeceshahay inuu u muuqdoo dadka kale. Markaa, taabo badhanka **Sii Soco**.

Please enter your name

Cancel Continue

7

Si la mid ah tillaabadii hore, Suum wuxuu kale oo rabaa inuu marin u helo makarafoonka qalabka ku rakiban. Hagitaan ayaa soo muuqan doona oo oranaya "Suum wuxuu jeclaan lahaa in uu dhex galo makarafoonka". Si tan aad u oggolaato, taabo **badhanka OK**.

"Zoom" Would Like to Access the Microphone
For people to hear you during meetings, Zoom needs access to your microphone.

Don't Allow OK

6

Ka dib, Suumm wuxuu u baahan yahay rukhsad si uu u galo kamarada qalabka ku rakiban. Hagitaan ayaa soo muuqan doona oranaya "Suum wuxuu jecelyahay inuu jid u helo kamarada". Si aad u oggolaado, taabo **badhanka OK**.

"Zoom" Would Like to Access the Camera
For people to see you during meetings, Zoom needs access to your camera.

Don't Allow OK

Ka dib, si aad u daarto kamaradda ugana qayb gasho wicitaanka aad hadda ku soo biireyso, taabo badhanka buluug ah Kula **biir badhanka Fiidiyoowga**.

Join without Video Join with Video

8

Mar labaad, Suum wuxuu u baahan yahay rukhsadaada, markan si uu u diro ogeysiisyo. Hagitaan ayaa soo muuqan doona ku oranaya "Suum ayaa jeclaan lahaa in uu kuu soo diro ogeysiisyo". Si tan aad u oggolaato, taabo **badhanka Oggolow.**

"Zoom" Would Like to Send You Notifications

Notifications may include alerts, sounds, and icon badges. These can be configured in Settings.

Don't Allow

Allow

9

Ugu dambeyntiina, marka la gelayo Shirka Suum, waxaa soo bixi doona hagitaan oranaya, "Si aad u maqasho dadka kale fadlan ku soo biir codka". Taabo **Wicitaanka adoo isticmaalaya badhanka codka ee Internetka** ka dibna kulanka Suum ayaa bilaabmi doonaa makarafoonkaaga oo daaran!

To hear others please join audio

Call using Internet Audio

Dial in

Cancel